Go'aan Lr: 472/2023.

Date: 18th November 2023.

## Go'aan Guddi Fulineed.

Shir ay isugu yimaadeen guddida fulinta maamulkan Caasimada Hargeysa 19th November 2023, Shir Guddoomiyena uu ka yahay ku-simaha Duqa Caasimada Hargaysa Mudane **(Khadar Axmed Cumar 'Khadar Nuur'**), kuna saabsanayd Madax Bannayn dhulka uu iibsadey MuwaadinC/casiis Jaamac Cali, Dood & falan-qayn dheer ka dib.

### Guddida Fulintu-

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkeen** | Sharciga Maamulka Gobolada & Degmooyinka JSL ee Xeer No: 23/2019. |
| **Markuu Arkeen** | Warqadda Maxkamada tixraaceedu ee **MDH/DFL/717/2022**, kuna taariikhaysan **4/11/2023**, ujeedadeeduna tahay Qaraar Maxkamadeed, kana soo baxday Xafiiska Garsooraha Maxkamada Gobolka Jeex (Isaxaaq Yaasiin Cabdi). |
| **Markuu Oggaadeen** | Warbixinta tixraaceedu yahay **DHH/DIK/91/2023**, kuna taariikhaysan **23/1/2023**, ujeedadeeduna Warbixin fayl la cancel garaynayo, kana soo baxday Xafiiska Guddoomiyaha Degmada I/Koodbuur. |
| **Markuu Xaqiiqsadeen** | In ay haboon tahay in loo madax baneeyo faylkan muwaadinka hoos ku xusan, maadama ay Maxkamaadu u xukuntay dhinaca loo fuliyaha, dhulkan oo ay isku hayeen laba dhinac, isla markaana la cancel gareeyo faylka soo dhex galaha ah ee uu ku qoran yahay Guuleed Maxamed Ismaaciil. |
| **Markuu Tixgeliyeen** | Tallada Masuuliyiinta ay hawshani khusayso. |

### Waxa ay Go'aansadeen:-

Ka dib markey arkeen dhamaan asbaabaha sare ku xusan, Gudida Fulintu waxa ay Go'aansadeen in loo madax bannaaneeyo dhulka ay Maxkamadu u aqoonsatay lahaanshihiisa muwaadinka magaciisu yahay (**C/casiis Jaamac Cali**) cabirkiisuna dhan yahay **18X24m**, kuna yaala degmada **I/Koodbuur**, isla markaana la cancel gareeyo faylka Tr-lambarkiisu yahay **19241**, kuna qoran yahay soo dhexgale Guuleed Maxamed Ismaaciil, kaas oo ka baxay dhulka loo fuliyaha, ka dib markey Maxkamada Gobolka Maroodi Jeex u xukuntay dhulkaasi loo fuliyaha, kana xukuntahay laga fuliye Maxamed Daahir C/laahi.

Allah Mahad leh.

**(Siciid Nuur Jaamac).**
**Xoghayaha Fulinta D/Hoose ee Hargeysa.**
**Ahna Xoghayaha Golaha Deegaanka Hargeysa**

**(Khadar Axmed Cumar 'Khadar Nuur')**
**Ku-simaha Duqa Caasimada Harg, ahna/**
**Ku-xigeenka Golaha Deegaanka Hargeysa.**

TJ = Nim
Cover
usaer
Goaan
gudi fulinl
[signature]
14-11-2023

JAMHUURIYADDA SOMALILAND REPUBLIC OF SOMALILAND

MAXKAMADDA GOBOLKAM-JEEX / REGIONAL COURT M-JEEX

**XAFIISKA GUDOOMIYAHA**

**MGH/DFL/717/2022** **04/11/2023**

Loo Fuliye: - C/Casiis Jaamac Cali =Hargaysa=
Qareen: Axmed Yaasiin Rashiid Cabdi =Hargaysa=
Lagu Fuliye: - Maxamed Daahir C/Laahi =Hargaysa=
Qareen: Maxamed Xuseen Caraale
Damiinul Maal:Xaamud Cabdi C/laahi Jimcaale =Hargaysa=
Sodhexgale: Guuleed Maxamed Ismaaciil =Hargaysa=
Qareen: Samiir Axmed C/laahi =Hargaysa=

Jamhuuriyadda Somaliland Maxkamadda Gobolka M-jeex-Hargeysa The Republic of Somaliland The Regional Court Of M-jeeh Hargeisa

UJEEDO:- QARAAR MAXKAMADEED.

**Maxkamada Gobolka M/Jeex Hargaysa**

**Markey Aragtay: -** gal dacwadeedka fulinta ah ee sumadiisa iyo dhinacyadiisu sare ay ku xusan yihiin

**Markey Aragtay: -** Arjiga codsiga fulinta ah ee ku taariikhaysan 12/11/2022 ujeedkiisuna yahay codsi fulin nootaayo Sum:CNP/H/482/2022,Ee Ku taariikhaysan 05/03/2020 ujeedkiisuna yahay iib dhul banan oo cabirkiisuna yahay 18X24,kuna yaala Hargaysa Degmada Ibraahim koodbuur xaafada jigjiga yar,nuxurkeeduna sidan :

1) Marka ugu horaysa waxaa uu lagufuliyuhu nootaayada horteeda igaga iibiyey dhul cabirkiisu yahay 18X24 Mt,dhulkaas oo ku yaala degmada ibraahim koodbuur,xaafada jigjiga yar,wuxuuna iga siiyey lacag dhan $13,000 dollar,isla markaana aan lacagtii wada siiyey, waxaana jirta markii aan is idhi dhulkii sharciyee,ee aan dawlada hoose u tagay, ay sheegeen in file hore uga baxay baloodhkan, waxaanu lagufuliyuhu damiinul maal ka ahaa dhulkaas isaga oo ku damiintay fayl guri oo sumadiisu tahay 35310

**Markey Aragtey: -** Digniinta fulineed ee Maxkamada Gobolka M-jeex ee sumadeedu tahay MGH/DFL/717/2023, ee ku taariikhaysan 17/11/2022 digniintan Oo

Maxkamada Gobolku ku amartay lagu Fuliye:Maxamed Daahir C/laahi in uu mudo 10 cisho gudahood ku wareejiso dhulka cabirkiisu yahay 18x24M Jihooyinkiisuna kala yihiin, Galbeed/Koonfur=Waddo,Waqooyi/Bari Dhisme Kuna wareejisid loo-fuliye C/Casiis Jaamac Cali

**Markey Aragtey:-** Jawaab Celinta Digniinta Fulineed ee sumadiisu tahay MGMJ/DFL/717/2022,Kuna taariikhaysan 17/11/2022,una dhignayd sidan aniga oo ah qareen maxamed xuseen caraale kuna hadlaaya afka lagufuliyaha sare ku xusan, waxaan halkan ugu soo gudbinayaa maxkamada sharafta leh jawaab celin kooban,aniga oo ku qanacsan iibka dhulkan oo cabirkiisuna yahay 24X18M dhulkaas oo ku yaala beetayada, seeskii uu ku samaystayna uu ku yaalo maalintii laga iibiyey, cid ku haysata oo dhaxlayaasha beet ahna ayna jirin, sidoo kalena aanu garnayn cid ka baxsan dhaxlayaasha beerta sifo inta ay sharci been abuura ula soo bixi karaan, dhulka aan hore uga iibinay lagufuliyaha sare ku xusan, sidoo kalena aan damaanad buuxda ku siinay sida ku cad warqada nootaayada, sumadeedu tahay CPN/H/482/2020 kuna taariikhaysan 05/03/2023, waxaanu halkan ugu soo gudbinaynaa maxkamada sharafta mudan in dhulkaasi uu leeyahay loofuliyuhu,dhulkaasina u madax-banaanyahay cabasho kasta oo ka timaadana aan u difaacayno lahaanshiisihiisa in uu leeyahay loofuliyuhu dhulkaas, sidoo kale waxaanu halkan ka cadaynaynaa anaga oo ah mulkiilayaasha beerta, ilma cabdilaahi bile jirina cid dhaxlayaasha ah oo cabasho ka keentay dhulkaas, dhulkaas oo markii loofuliyuhu dalbaday in uu fayl u samaysto dhistana uu GPSku sheegay in dhulkaas hore fayl uga baxay, oo TR: kiisuna yahay sida ay sheegeen dawlada hoose, faylkaasi cida ku qorana aanay ka iibin dhaxlayaasha beertu,iibiyahana aananu garanayn meel uu ka ka soo galay beerta maadaama aanu sifo sharci ah ku soo galin

Sidaa darteed waxaan maxkamada sharafta mudan ka codsanayaa sidan

samaysanay dhulk sharci iyo file, anaga beerta la'haanshaheed shaqo kuma lihin dhulkaas waa nalaga iibiyey waxaana naga iibiyey hanad sidaa awgeed waxaan codsanaynaa in dhulkaas maxkamadu nala soo eegto noona xukunto.

**Markey Dhagaysatay:-** soojeedinta qareenka loofuliyaha una dhignayd sidan: aniga oo ah qareenka loofuliyaha kuna hadlaaya afkiisa iyo magaciisaba, si waafqasan Qo: 54,55 XHM.waxaan halkan maxkamada sharafta leh ugu soo gudbinayaa, soo jeedin kooban waana sidan: Dacwadani waxay furantay oo ay Maxkamada soo gashay,horaantii sanadka anaga oo dalbanaynay in naloo fuliyo baloodh cabirkiisu yahay 18X24M, oo uu muwakilkayga ka iibiyey, lagufuliye maxamed daahir c/laahi, lagufuliyaasha waxay taageereen in ay lagufuliyaha dhulka ka iibiyeen, halkaa markay marayso waxaa soo dhex galay daraf kale, maalintii darafkaasi soo dhexgalay maalin qudha dacwada kama soo qayb galin iyada oo la gaadhsiiyey 4 mudaymood oo sharci ah, afartaba uu cudur daar la'aan kaga maqnaaday soo dhexgaluhu diyaar uma aha ujeedadiisuna waa meer-meerin sidaa darteed waxaanu maxkamada sharafta mudan ka codsanaynaa in fulintu halkeedii nooga sii socoto.

**Markey Dhagaysatay: -** soojeedinta qareenka lagufuliyaha una dhignayd Maxkamada sharafta mudan waxaan u sheegaynaa in aan ayidsanahay qoraalkayagii aan Galka hore u soo galinay,qoraalkaas oo aan ku taageernay dalabka loofuliyaha iyo digniintii maxkamada, muwakilkaygu waa iibiyaha dhulka dacwadu ka socoto sidaa awgeed waxaanu maxkamada ka codsanaynaa, loofuliyaha dhulkiisii loo fuliyo.

**Markey Aragtey: -** Heshiiska Nootaayo ee sumadiisu tahay CNP/H/482/2022, Ee Ku taariikhaysan 05/03/2020 ujeedkiisuna yahay iib dhul banana oo cabirkiisuna yahay 18X24M, kuna yaala Hargaysa Degmada Ibraahim koodbuur.

- In sharciga la horkeeno ninka mulkiyada sharci darada ah kala soo baxay dhulkii lagu fuliyaha.
- In labaabiyo gabi ahaanba mulkiyadaa sharci darada ah.
- In loo xukumo dhulkaas loofuliyaha dhulkaas loona fuliyo dhulkaas oo wax dhismo ah aanu wali ku dhicin. Seeskii loofuliyuhuna wali ku yaalo.
- In loofuliyo sifo kasta oo sharcigu ogol yahayna loogu ogolaado in uu isticmaalo.
  - In aanu damaanad qaadayno loofuliyaha dhulkiisaa sidii aan horeba
  - ugu cadaynay loofuliyaha dhulkaas in uu isticmaali karo.

**Markey Dhagaysatay: -** Dood Afeedka loofuliyaha una dhignayd sidan:aniga dhulka waxaa iga iibiyey maxamed daahir waxaana damiin ka haa xaamud Cabdi C/laahi iyo jimcaale waxayna ahayd 2020 kii kadib markii aan sharciyeyso is idhi waxaan arkay in uu fayl ka baxay sharcina uu u haysto ruuxaasi dabeeto maxkamada ayaan u soo dacwooday oo aan codsi u soo qortay, in dhulkaas lay fuliyo layna madax-banaaneeyo, waxayna tirtirtay faylkii hore uga baxay dhulkaas.

Markey Dhagaysatay:- Dood afeedka qareenka lagufuliyaha una dhignayd sidan: ugu horayn waxaanu ayidsanahay arjiga aan soo qornay 17/11/2022,arjigaas oo waafqasan digniinta maxkamada gobolka hargaysa ka soo baxaday ee sumadeedu tahay. MGMJ/DFL/717/2022 muwakilkayga Maxamed daahir ayaana ka iibiyey baloodhkaa loofuliyaha cabdicasiis baloodhukuna waxaa uu ka soo horjeedaa ilma maxamed beerta markii la qorsheeyey waxaa dhaxal u helay jimcaale bile wuxuuna ka mid ahaa baloodhkan 5 baloodh oo jimcaale dhaxal u helay, cid kale oo ay sharciyeeyeena majirto.

Markey Dhagaysatay: - Dood afeedka qareenka soo dhexgale ah una dhignayd sidan anaga waxaa naga iibiyey dhulkan hanad intaas kadibna waxaan u

**Markey Aragtey:-** Qaraarka soo dhexgalinta ah ee sumadiisu tahay MGHJ/DFL/717/2022, Ee ku taariikhaysan 15/05/2023, ujeedkiisuna yahay soo dhexglin dhinac sadaxaad.

**Markey Aragtey: -** in aanu soo dhexgaluhu hor iman Maxkamada Horteeda Maalinta qudha isaga oo mudaymo afar ah loo geeyay, qareenka soo dhexgaluhu aanu usoo gudbin Maxkamada wax cadaymo ah oo dhulkaasi ku mulkiyey soo dhexgaluhu kuna dooday in dhulkaasi ka iibiyay soo dhexgalaha nin la yidhaahdo Hanad.

**Markey Aragtey: -** Labada Nootaayo ee loofuliyaha iyo soo dhexgalaha heshiiska loofuliyaha ee sumadiisu tahay CNP/H/482/2022, ee ku taariikhaysan 05/03/2020 iyo heshiiska soo dhexgalaha ee suamdiisu tahay XNM/962/201,ee ku taariikhaysan 23/03/2021.

**Markey Aragtey: -** Qodobada: **432,338,272,273,62,279, XHM**

Asbaabahaas Oo Dhan Dartood Waxay Maxakamadu Soo Saartay Qaraarkan

**Jamhuuriyada Somaliland**

**Maxkamada Gobolka M/Jeex Haraysa**

## Qaraarka Maxkamadda

**Maxakamada Gobolka M/Jeex Hargeysa**

1. Waxay Maxakamadu u aqoonsantay lahaanshaha dhulka cabirkiisu yahay 18X24Mt loofuliye C/Casiis Jaamac Cali dhulkaas oo jihooyinkiisuna kala yihiin Galbeed/Koonfur = Waddo,Waqooyi/Bari= Dhimse.
2. Waxay maxkamadu qaraarisay in soo dhexgale Guuleed Maxamed Ismaaciil uu ku leeyahay cidii wax ka iibisay oo ah Hanad Xaashi Axmed dhulkii ama qiimaha maanta uu maraayo.
3. Waxay maxkaamdu baabi'isay sharciga dhulkaasi ku qoranyahay soo dhexgale Guuleed Maxamed Ismaaciil ee tirsigiisu Yahay TR-no 19241
4. Qaraarkani Waxaa Uu Soo Baxay Maanta Oo Ay Taariikhdu Tahay 04/11/2023

**(ISAXAAQ YAASIIN CABDI)**

Garsooraha Maxkamada Gobolka M/Jeex

=H A R G A Y S A=

Jamhuuriyadda Somaliland Maxkamadda Gobolka M/Jeex-Hargeysa Republic of Somaliland Regional Court Of M-jeeh Hargeysa

4243670

Jamhuuriyada Somaliland
Dawlada Hoose Hargeysa

Republic Of Somaliland
Municipality Of Hargeisa

**Xafiiska Guddoomiyaha Degmada IK/Buur**

Tix:- DHH/DIK/ 91 /23

Date:- 23/01/2023

Ku:- Ku-xigeenka Duqa Caasimadda — Hargeisa
Og:- Xoghayaha Fulinta D/Hoose — Hargeisa
Og:- Duqa Caasimadda –Jsl. — Hargeisa

## UJ:- Warbixin.

**Mudane Maayor:-**

Tixraac warqadda summadeedu ahayd **Ref:- MGM/DFL/717/2022** kuna taariikhaysan **04/01/2023**, Ujeeddadeeduna ahayd Amar Madax Bannaanayn DhulCabbirkiisu yahay **18x24m**, Jihooyinkiisuna kala yihiin:- **GK/Waddo, WB/Dhisme,** kana soo baxday, kana soo baxday Garsooraha Maxkamadda Gobolka Maroodi-Jeex.

Hadaba, Guddoomiye, waxa Jirta inay Maxkamaddu na soo Amartay in la **Cansel-gareeyo Faylka TR/No:-19241**, kuna qoran yahay **Guuleed Maxamed Ismaaciil,** Maadaama oo aanu kaaga baahanahay in aad warqad soo qortid aad ku Cansel-garaynayso Fayllkaasi, ay **CanseL- garaysay** Maxkamadda degmadu

Sidaasi darteed, Waxaanu kaa Codsanaynaa inaad na soo siiso Amar aanu ku **Cansel-Garayso**, innaga oo raacayna amarka Maxkamadda degmada Hargeysa.

**Allaa Mahad Leh**

**( Max'ed Salaan Max'ed)**
**Guddoomiyaha Degmada I/K/Buur**
**Hargeisa**

**( Max'ed Cabdi Ismaacill )**
**Madaxa Qorshaha Deg/ IK/bBuur**
**Hargeisa**

To: Nimco
u gor Goray
Gudi